

QARAMADA MIDOUBEY



UNITED NATIONS

Xafiiska Madaxa Qaramada Midoobey & Xiriiriyaha Bani'aadamnimada ee Soomaaliya

Springette, Off Lower Kabete Road, gacantaada bidix ka dib Saldhigga Booliiska ee Spring Valley, P.O. Box 28832, 00200, Nayroobi, Kenya
Tel. (25420) 4183640, 4183642/3/4; Fax (25420) 4183641

QARAMADA MIDOUBEY WAXA AY CAMBAAREYSAA WEERARKA LOO GEYSTHEY XARUN QARAMADA MIDOUBEY KU LEEDAHAY KOONFURTA SOOMAALIYA

[NAYROOBI, 17 Agoosto 2009] Axaddii bisha Agoosto ay ahayd 16, xilli ku beegneyd duhurradii ayaa xarunta WFP ee ku taalla magaalada Waajid ee Koonfurta Soomaaliya ay soo weerareen maliishiyaad hubaysan. Weerarkan ayaa ah kii afaraad oo si ula kac ah xero Qaramada Midoobey ku leedahay Soomaaliya loogu bartilmaameedsado muddo laba bilood gudahooda ah.

Qaramada Midoobey ayaa si adag u cambaareyneysa weerarka. "Weerarka tooska, ula kaca iyo joogtadaba ah ee lagu hayo ururada gargaarka iyo shaqaalaha gargaarka waa mid aan loo dulqaadan karin," ayaa uu yiri ku-simaha Madaxa Qaramada Midoobey iyo Xiriiriyaha Bani'aadamnimada ee Soomaaliya, Mudane Grahim Farmer.

Mudane Farmer ayaa ku booriyey dhammaan dhinacyada in ay oggolaadaan in si caqabad la'aan ah gargaarka bani'aadamnimada loo gaarsiiyo dadka u baahan meel kasta oo ay joogaan, maaddama tallaabooyinka noocan ahi ay halis weyn gelayaan dadka horeba u jilicsanaa. Ku dhowaad 3.2 milyan oo qof oo Soomaali ah ayaa u baahan gargaar bani'aadamnimo.

Macluumaad dheeri ah kala soo xiriir: Carrie Howard, Sarkaalka Macluumaadka Dadweynaha, +254-7325-00022 ama howard@un.org.